

Adeegyada Gudniinta Wiilasha ee Greater Manchester

Tilmaambixinta sida aad u dooran lahayd
adeega saxa ah ee wiilkaaga

Greater
Manchester
SAFEGUARDING

Adeegyada Gudniinta Wiilasha ee Greater Manchester

Tilmaambixinta sida aad u dooran lahayd adeega saxa ah ee wiilkaaga

Haddaba waxaad go'aansatey inaad wiilkaaga guddo, buug yarahan waxay kaa caawin kartaa inaad go'aansato qofka aad adeegsan doonto.

Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato

- Inkastoo badanaaba wiilasha ay si fiican u bogsadaan dhibaato la'aan, sida dhamaan qaliimada, gudniintana waxay xambaarsan tahay halis dhibaato.
- Adeegyada Caafimaadka Qaranka NHS maalgelin kuma sameeyso gudniinta wiilasha ilaa aan ka ahayn haddii ay jirto sabab caafimaad.
- Golaha Caafimaadka Guud waxay aqoonsan tahay in gudniinta wiilasha la sameeyn karo asbaabo diimeed iyo dhaqamo darteed.

Da'da

Waxaynu ku talinaa in aad wiilkaaga guddo markii uu aad u sii yar yahay ee suurtagal ah. Buug yarahan waxay quseysaa oo keliya gudniinta lagu sameeyo bulshada dhexdeeda oo loogu tala galay wiilasha da'dooda ka yar hal sano.

Ogolaansho

- Labada waalidba iyo/ama daryeeleyaasha leh mas'uuliyada waalidnimo waa inay bixiyaan ogolaanshaha ka hor inta aysan qaliinka bilaabanin. Ogolaansho bixinta micnaheedu waa inaad dooneyso in wiilkaaga la guddo, iyo in qaliinka iyo halista ka iman karta lagu sharaxay.
- Adiga waa inaad dareentaa xornimadaada inaad wax weydiisato. Haka baqin inaad weydiisato. Dhamaan dhaqaatiirta wanaagsan waxay ku faraxsan yihiin inay weydiimahaaga kaa jawaabaan. Waa inaad kalsooni ku lahaataa dhaqtarka aad adeegsaneyso.
- Dhaqtarka wuxuu ku weydiin doonaa arinta ku saabsan caafimaadka wiilkaaga iyo taariikhda caafimaad ee qoyska ka hor intuu gudniinta sameeynin. Wiilkaaga caafimaadkiisa waa inuu fiicnaadaa gudniinta ka hor.

Nadiif & aan lahayn jeermis

Goobta waa inay nadiif ahaataa. Waa in la isticmaalaa qalabyo aan jeermis lahayn, si ay u dhinto halista infekshanka ee wiilkaaga inuu ka qaato. Dhaqtarka fiican wuxuu isticmaali doonaa qalab iyo xeelado loo qaabeeyey inay qaliinka ka dhigto sida ugu badbaadsan ee suurtagalka ah.

Waxaa laga yaabaa in gudniinta aad ka dhigato qayb ka mid ah dabaaldeq qoyseed, laakiin xasuusnow, gudniinta waa qaliin waxayna u baahan tahay in lagu sameeyo goob haboon oo deganaansho leh iyo qalab nadiif aan jeermis lahayn.

Goobjoogitaanka xilliga gudniinta

Haddii aad dooneysid inaad la joogto wiilkaaga xilliga gudniinta waxaad u baahan tahay inaad arintani aad la hadashid qofka gudniinta sameeynaya. Dhaqaatiir qaar, ma aha dhamaan, way ku faraxsan yihiin inad goob joogto, haddaba arintani la hadal marka hore ee aad la kulanto.

Maareynta Xanuunka

Gudniinta markii la sameeyo waxaa laga yaabaa inay noqoto mid wiilkaaga xanuun dareemo. Xilliga gudniinta waa in lagu sheegaa sidii aad u maareyn lahayd, iyo sidii aad u sii dhimi lahayd xanuunkiisa kadib guriga dhexdiisa.

Daryeelka ka dib

Wiilkaaga waa in lagu haaya goobta ugu yaraan 30 daqiiqadood ka dib markii ay istaagto dhiiga gudniinta. Shaqaalaha waa inay kuu sheegaan waxa dhici doona ka dib iyo sida aad wiilkaaga u daryeeli lahayd. Markii guriga aad baxdo waa in lagu siiyaa buug yaraha faahfaahsan sida aad wiilkaaga u daryeeli lahayd, oo ku jira xilliga iyo goobta aad caawimaad ka raadiso iyo calamaad kasta oo aad ka taxadarto. Waa in lagu siiyaa telefoon lambar xiriirin inaad isticmaasho haddii aad lahaato wax welwel ah.

Haddii ay kugu dhacdo welwel ku saabsan wiilkaaga ee gudniinta ka dib, waa inaad la xariirtaa dhaqtarka. Haddii aadan la xiriiri karin, ama aadan ku faraxsanayn taladooda, waa inaad wiilkaaga geeysaa qaybta Gargaarka Degdega ee deegaankaaga.

Xusuusnow haddii aad timaado gudniinta haddana aadan ku faraxsanayn waxkasta ama aad welwel ka qabto caafimaadka wiilkaagaa sabab kasta, qasab ma aha in waqtigan la guddo. Dhaqtar kasta oo wanaagsan waa inuu ku dhegeystaa welwelkaaga haddana dib u dhigaa ama baajiyaa haddii aad sidaasi adigu rabtid.

Adeegyada Gudniinta Wiilasha ee Greater Manchester

Dacwooyin

Haddii aadan ku faraxsanayn arinta ku saabsan adeega aad heshay marka hore la hadal dhaqtarka gudniinta sameeyey. Haddii aadan ku faraxsanayn jawabtooda waxaad la xariiri kartaa adeega NHS PALS. Ururadani waxay kaa caawin doontaa waxa aad u baahan tahay inaad sameeyso.

Gudniinta gabdhaha ma laha faa'idooyin caafimaad waana sharci darro sida hoos timaada Xeerka Gudniinta Gabdhaha ee (2003)

<http://www.gmsafeguardingchildren.co.uk/>